# Human Papillomavirus (HPV)
# Human Papillomavirus (HPV) (Somali)

Human papillomavirus (HPV) waa cabuqa ugu badan ee galmada lagu kala qaado (STI). Shaqsi kasta oo galmoon kara ayaa qatar ugu jira inuu ku dhaco HPV. Dadka intooda badan ma laha calaamado ama way ogyihiin inay qabaan. Oo waxay ku daaran karaan kuwa kale ayagoo aanan ogeyn.

Inta madan, HPV waa mid aan wax toona dhibaateyn oo iskiisa ayuu iskiiga baab'ikaraa. Qaarar kamid ah HPV, waxaad ku lahaan kartaa:

- Burooyin xubinta taranka. Kuwaani waxay u muuqdaan hambur kuuskuus yaryar ama raxan hambur kuuskuus ah ku wareegsan xubnaha taranka.
- Kansar xaga afka ah ama cunaha, siilka, ilmo galeenka, guska, ama dumburta.
- Baaritaanka pap smear oo aan caadi ahayn (baaritaan ilmo-galeenka). Tani waxay dhacdaa marka HPV lagu dhex arko natiijooyinka baaritaankaaga. In natiijooyinkaaga baaritaanka lagu dhex arko HPV macnaheedu maaha inaad qabtid burooyinka xubinta taranka ama kansarka. Waxa laga yaabaa inaad u baahato in aad marar badan laguu sameeyo baaritaanka pap smears.

## Siduu ayuu ku faafaa Xanuunka HPV

HPV wuxuu si fudud ugu faafaa galmada, isku dhawaanshaha maqaar ilaa maqaarka. Tani waxay dhici kartaa marka faruuryaha xubinta taraanka, siilka, afka ilmo-galeenka, guska, ama futada ay taabtaan xubinta taranka, afka, ama cunaha qofka cudurka qaba.

 ©2024, Nationwide Children's Hospital sii socdaa…

## Xaqiiqaha Halista

- Nidaamka difaaca jirka oo daciifa.
- In ka badan 1 lammaane oo galmo lala yeesho.
- Anan qaadan talaalka HPV.
- Samaynta galmada ka hor da'ada 18 sano. Waxaad haysataa fursad sare oo aad ku qaadi karto nooc halis ah oo HPV ah.

## Baaritaanka HPV

Baarista joogtada ah ee HPV ma aha heer caadi ah sababtoo ah waa mid iska caadi ah. Si kastaba ha ahaatee, baaritaanka waa la samayn karaa haddii ay jiraan dhibaatooyin. Baaritaanada qaar waxaa lagu ogaan jaraa kansarka afka ilmo galeenka kasoo sababay HPV, laakin majiraan baaritaano lagu ogaan karo HPV afka ama midka cunaha.

Laguuguma talinaayo baaritaanka HPV hadii:


- Uu ku dhashay mid rag ah.
- Yahay mid kureey ah.
- Uu yahay mid u dhashay dumar kana yar da'ada 30 jir.

## Ka hortaga

Galmo la'aanta (ka-fogaanshaha kalmada) ayaa ah habka ugu fiican ee looga fogaado HPV iyo STIs kale. Hadii aad sameeyso galmo, qaar kamid ah sheeyadaan ayaa caawin kara ineey ka hortagaan faafida HPV:

- Yaree tirada lamaanayaasha ee aad la galmooneeyso. Ogoow lamanaahaga(yaasha) iyo taarikhda galmooyinkooda hore.
- **Isticmaal kondhom** mar kasta oo aad galmo samayso wakhtiga idil oo aad sameeneyso galmo.
- Hayso kondhom dheeri ah lacala hadii kan aad hada isticmaaleyso dilaaco.
- Iska baadh STIs kale iyo HIV. HPV wuxuu kordhin kartaa halista caabuqyada kale.
- Hel baaritaanno joogto ah oo afka ilmo-galeenka ah haddii aad u dhexeyso da'da 21 iyo 65.
- Qaado talaalka HPV. Waxay kaa caawinaysaa inaad iska ilaaliso qaar ka mid ah noocyada kansarka HPV-ku-taxluuqeysan iyo qaar ka mid ah cudurrada HPV-ga la xiriira, sida burooyinka xubnaha taranka iyo futada iyo korriinka burooyinka u eg ee unuga codka.

- Carruurta da'doodu u dhaxayso 9 ilaa 14 waxay helayaan wadar ahaan 2 tallaal. Qiyaasta 2 waxa la bixiyaa lix bilood kadib qiyaasta 1. Talaalka ayaa wuxuu waxtar wanaagsan u leeyahay ka hor inta uu san ilmahaagu noqon mid galmoon kara.
- Kureeyda iyo qaan gaarada yar ee da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 26 waxay helayaan wadar ahaan 3 tallaal. Ka dib qiyaasta 1, qiyaasta 2 ayaa la bixiyaa hal bil ka dib. Qiyaasta 3 waxa la bixiyaa lix bilood kadib qiyaasta 1.
- Tallaalka HPV waa badbaado oo ma keeno waxyeelo falcein oo halis ah. Falcelinta fudud ee caadiga ah waa xanuunka meesha tallaalka la siiyay, qandho heerkeedu hooseeyo, iyo daal (Sawirka 1).



**Sawirka 1** Tallaalka waxa lagu siiyaa cududda sare. Aagaani ayaa xanuun laga dareemi karaa kadib durista.